



Waxay tahay in Qoysaska Haysa Caruurta Ay Ka Ogaadaan Talaalka COVID-19

Waanu ognahay in dad badan ay qabaan su'aalo ku saabsan talaalka COVID-19 ee ilmahooda. Hoos waxaa ku yaala jawaabaha su'aalaha caamka ah ee waalidka iyo daryeelayaashu ay waydiiyeen.

1. Talaalka COVID-19 waxa uu baraa jidhkeena sida uu ula dagaalamayo COVID-19 isaga oo aynaan ku xanuunsan.

Talaalada COVID-19 waxay siiyaan jidhkeena aragti sida fayraska COVID-19 uu u shaqeeyo markaa nidaamka difaaceenu wuu garan karaa oo wuu la dagaalamayaa. Waxa uu sidaas sameeyaa isaga oo baraya jidhkeeda inuu sameeyo borootiinada xanuunka u gaarka ah ee loo yaqaan antiboodhi si uu inoo ilaaliyo. Talaalada COVID-19 kuma qaadno COVID-19.

In kasta oo fayraska COVID-19 laftiisu uu cusub yahay, saynisyahanadu waxay daraasad ku samaynayaan noocyadan fayraska, loo yaqaan korona fayras, mudo toban sano ah. Dhamaan talaalada COVID-19 ee yaala Maraykanku waxay mareen tijaabada caafimaadka oo waxa u ansixisay u isticmaalka xaaladda degdega ah Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka Maraykanka. Waxaa ku taliyey khabarada caafimaadka iyo caafimaadka dadwaynaha ee heer qaran iyo halkan Vermont.

Malaayiin ruux ayaa iminka si amaan ah u qaatay talaalka COVID-19, oo waxaa ku jira caruurta iyo dhawr iyo toban jirro.

2. Dadka qaar ayaa ka qaadi kara saamayn caafimaad daro talaalka, laakiin caadiyan waa kuwo aan cuslayn oo mudo dheerna ma jiraan.

Talaalka waxaa loo sameeyay qaab uu caruurta u siiyo badbaado isaga oo ayna ka qaadaynin saamayn caafimaad daro oo aad u badan. Xadiga talaalka ee caruurta waxay ka yar tahay xadiga dadka ah 12 jir iyo ka wayn.

Dadka qaar ayaa yeesha saamayn caafimaad daro mudo kooban kadib marka la talaalo, halka dadka qaarna ayna dareeminba waxba. Saamaynaha caafimaad darrada kale ee talaalada COVID-19 waa calaamadaha caadiga ah ee tilmaamaya in jirkaagu difaac ka samaysanayo COVID-19. Saamaynada caafimaad darrada ugu daran waxaa weeye: Xanuun gacanta halka la iska talaalay, xumad, qadhdhadyo, iyo daal.

3. In aan la qaadan talaalku waxa uu leeyahay khatar sida xanuun daran, mushkilad wadne, iyo astaamo aan baaba'in.

In aan la talaalin waxay kordhisaa khatarta ilmahaaga ee inuu ku xanuunsado COVID-19. Caruur badan ayaa yeesha xanuun yar, laakiin qaar ayaa aad ugu xanuunsada oo u baahda in la dhigo isbitaal.

Dadka qaar ku xanuunsada COVID-19 waxay yeelan karaan astaamo aan baabi'in mudo dheer (COVID mudo dheer ah). Astaamaha ugu caansan ee caruurta waxaa kamid ah daal, madaxxanuun, hurdada oo ku yaraata, fiirsiga oo dhib noqda, murqe iyo laalabatooyin xanuun, iyo qufac.

Khatarta olol wadnaha ah (myocarditis) ayaa kaga badan caabuqa COVID-19 marka loo eego ka talaalka. Myocarditis waxaa

weeye saamayn caafimaad daro naadir ah oo la xidhiidha talaalka COVID-19, laakiin iskeed ayay iskaga baaba'ada iyada oo aan la dawaynin.

Xaalad naadir ah laakiin khatar ah oo la xidhiidha caabuqa COVID-19 ee caruurta oo keenta oolka (bararka) xubnahooda oo loo yaqaan multisystem inflammatory syndrome, ama MIS-C. Saynisyahanada ayaa weli wada daraasada MIS-C iyo sida ay u saamayso caruurta.

Qaabka ugu wanaagsan ee loo ilaalin karo caruurta waa in laga caawiyo kahortaga caabuqa COVID-19 – qaadashada talaalka, xidhashada waji gashad tayo sareeya, iyo iska ilaalinta meelaha dadku ku badan yihiin.

4. In la iska talaalo COVID-19 waxa uu leeyahay faa'idooyin wayn.

Talaalada COVID-19 waxa uu yareeyaa khatarta in dadku gudbiyaan fayras keena COVID-19. In cid kasta oo u qalanta la talaalo waxay ka caawin kartaa qoyska dhan, oo ay ku jiraan walaalaha aan u qalmin talaalka iyo xubnaha qoyska ee khatarta badan ugu jira inay qaadaan xanuunka aadka u daran hadii cudurku asiibo.

Talaaladu waxay bixin karaan badbaado dheeraad ah marka loo eego caabuqa COVID-19 ee hore. Dadka aan la talaalin ee hore u qaaday COVID-19 waxay u badan tahay inay markale qaadaan fayraska marka loo eego dadka wada dhamaystay talaalka.

Marka caruurta ku sugan Vermont laga heley COVID-19, waxay saamaysaa qoysaska, barnaamijyada daryeelka caruurta, iyo dugsiyada. Talaalida caruurta waxay ka ilaalisaa xanuunka aadka u daran oo waxay ka caawin kartaa joojinta faafitaanka COVID-19 ee bulshada.

Talaalku sidoo kale waxa uu ka dhigan yahay inaad hesho xorriyad badan si marka caruurta Vermont ay usii wataan hawlahoodii caruurnimada. Waxa yaraanya warwarka la qabo ee la kulanka asxaabta iyo qoyska, socdaalka, iyo tagida dugsiya.

5. Waxaad ka caawin kartaa caruurta inay u diyaar garoobaan qaadashada talaalkooda COVID-19.

Waalidka iyo daryeelayaasha ayaa kaalin wayn ka ciyaari kara ka caawinta caruurtooda inay u diyaar garoobaan wixii talaal ah. Kala hadal waxa ay filan karaan marka la talaalo, iyo waxa dhici kara maalmaha ku xiga. Waxa ay dareemi karaan waxoogaa xanuun ah maalin ama laba maalmood kadib marka la talaalo, laakiin mudo dheer ma jiri doono.

Waxa aad kala hadashaa sida talaalku u bari doono jidhkooda la dagaalanka fayraska COVID-19, iyo in marka ay is talaalaan ay qof kasta oo ku xeeran uga caawinayaan inay is ilaaliyaan.

Macluumaad dheeraad ah oo loogu talagalay waalidka iyo daryeelayaashooda:

- Qaadashada Talaalka COVID-19 (Waaxda Caafimaadka Vermont): www.healthvermont.gov/MyVaccine | www.healthvermont.gov/KidsVaccine
- Sayniska ka Danbeeya Talaalka COVID-19: Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiiyo ee Waalidka (Machadka Maraykanka ee Caafimaadka Caruurta):: www.healthychildren.org/English/health-issues/conditions/COVID-19/Pages/The-Science-Behind-the-COVID-19-Vaccine-Parent-FAQs.aspx

Janaayo 2022